Badda-Xeebta

Tom iyo Iben waxaa ka dhaxeeyay xidhiidh qarsoodi ah. Hadda waxuu jaray xidhiidhkedii, wuxuuna eedaynayaa inuu dareenkiisu haddii kale noqonayo mid xoogan. Iben waxa uu fahansanyay inaysan ahayn markii ugu horeysay oo uu gogoldhaaf samayo. Wuu diiday. Si degdeg ahna Kulankii ayaa joogssday. wax khatar ah ayaa ku dhacay gabartii Tom Becki.

Kabaryeeriyad ayaa ku salantay ku soo dhowaada Xeebta.

*

Gabarta yar ee Becki qof ayay si kalsooni ah kala sheekaysanysaa intetnaytka. Waxay la weydiiyay su'aal ku saabsan xusuus aysan weligeed ilaawi doonin, iyo waxay ka sheekaysaa markay ayeydeed aabbo xeebta la taagnayd.
Ayeeyo aabbo waxay tahay badbaade ka timid''Auschwitz'' oo ah qaybta nasiga jarmlaka sido kale waxay uga sheakaysay sheeko baraleey ku saabsan adunnka biyaha dhulka hoostiisa iyo diinnanka.
qofka qalaad wuxuu ku waraysan inuu wax ogaado.

*

Wiilka yar ee Firus waxaa uu is waydiinyaa in dhagaystayaashu ama daawadayashu ka socdaan xagga askarta.

*

Ronda, Eriksson, Lennart iyo Marta waxay shir ku leeyihiin guriga dad weynaha halkaas oo ay degenyihiin.
Ronda iyo Eriksson waxay ka sheekaynayaan xidhidhka ka dhexeeya.
Lennart wuxuu la kulmyaa Lotti, (shukkansi isku raacaya)
Tom wuxuu la yimid Marta oo ku fadhida kurisga curyamiinta. Waanu fahansannahay inay tahay Becki ayeeydeed aabbo, oo ay dhimantoondo goor dhow.
Waxay doonaysaa inay markii ugu danbeeysay ay Becki tusto wax. Kuwa kalena waxay ka ballan qaadeen inay iydada shaqada ka caawindoonaan.
Tom iyo Marta way ku adagtahay inay is agjoogaan ama iska agdhawyihiin.

*

Lotti waa mamulaha fasalka 8C. waxay sheegaysaa in fasalkan dhibaato ka jirtay iyo weliba inay usoo bandhigtay buug ku saabsan galmada iyo wada noolaanshaha, iyo inay shoog ka qaaday waxa ku qoran ama kusaabsan. Iydadu waxay tilmaamaysaa inay wax dheeceen oo aysan sheegi karin sir ahaan darteed. Waxay uga tagatay dhegaystahayaashu inay fasalka kala sheekaystaan.

*

Dhalinyarada Miguel iyo Hanna waxay ka yimaadeen xaflad. Waxa uu mobiilkiisa ka tusayaa sawiro taas oo ay ka xumaanayso.

*

Ardayda fasalka 8C, John, Miguel, Hanna, Firus iyo Kisser waxaa laga wareysanayaa shukaansiga ama isu dhowaanshaha. Wadahadalka ayaa ku billabanaya inta u dhaxaysa caajis iyo maadooyin culus, lagabilaabo dickpicks (sawiro xubinta taranka ragga) iyo dhibaatooyinka galmada ee nololmaalmeedka, iyo isu dhowwanshaha jacaylka.
Hanna waxay aragtay wax iyadu aad u welwel geliyay. Waxayna sheegatay inay ogatahay in wax khatar ah ay dhaceen, Lakiin aysan sheegi karin waxay tahay.
Becki sidoo kale iyaduna waxay dhigataa fasalka, lakiin way maqneeyd muddo labo todobbad ah.
Xafaldii ayay wax ku dhexmareen Hanna iyo Miguel. John waa ka masayrsanyahay, lakiin sidoo kale isaguna waxuu ku mashqulsanyahy porr-(sawiro dadka qawan).
Miguel waxa uu u maleynayaa in ay heli lahaayeen talooyin khaas ah halkay ka helayaan su'aalo.

*

Katja waxay cod ahaan u sharaxaysaa filmada dadka qaawan.

*

Waalidiinta habeenkii lugaynaya ee fasalka, Iben (Hooyada kisser), Jaime (Aabaha Miguel), Robban (Aabaha John) iyo Daniela (Hooyada Becki) ayaa is baranaya. Jamie ayaa ammaanaya shaqada gaarka ah ee ay Becki qabatay oo ku saabsan (förintelsen) baabi'inta dadka yuhuudda ah markii lagu jiray dagaalkii labaad ee aduunka (Holocaust).
Isaga iyo Daniela wuxay ka hadlayaan nidaamka fashiisiga (fascismen) iyo masuu'liyadda dadka markhaantiga ah. Katja (hooyada Hanna) way soo habsaantay. Hadda wada hadalku wuxuu ku saabsanyahay buuga ay Lotti dhigtay fasalka.
Lotti ayaa ku waramyasaa in ay wax culus ku dhaceen arday, iyo inay wax caddayn ah ay ku qoran tahay buuga. Daniella, Hooyada Becki ayaa u malaynaysa inay ogatahay wixii dhacay.

Daniela ayaa ka sheegaysaa markii ay soo gashay guriga innu ahaa shanqar la'aan. Markii ay soo gashay qolka Becki si ay u siiso liinta mandarinta waxay la kulantay ur xoog qarmuun badanleh.

*

Becki iyo saxiibkeed waxay kawada sheekaysan internaytka.
saaxiibkeed ayaa u sheegaya inuu san aaminin dadka, kadib markii mid ka mid ah uu khiyaaneeyay ama qalbi jebiyey. Wuxuu ku fekeray haddii ay cafin lahayd haddii qof been u sheegi lahaa. Becki ayaa sheegtay in loogu waco qof foolxun oo la yaableh markay iskoolka joogto. Saaxiibkeed waxuu aaminsanyahay inay tahay qof caqlibadan oo qoruxbadan.

*

Qolka aqalka dadweyna ayaa waxaa iskugu yimid kooxda taageera dadka ay haysato dhibaatooyinka la xiriira galmada. waxay si wadajir ah oo degan u aqrinayaan salaadda deganaanshaha oo loo yaqaan (sinnesrobönen).
Tom waa ku cusubyahay. Iben, Christina iyo Lennart hore ayey uga qeybqaateen.

Steven waa terabiiste (qof dadka caawiya). Christina waxay ka sheekaynaysaa nafiskii ay dareentay kadib qirashadii intii lagu jiray kulankii todobaadkii hore.
laakiin taasi waxay keentay inay in ay isla markiiba ay mar kale xadgudub galmo samayso.
Lennart wuxuu isku sheegay ama isu soo bandhigay sidii qof dhib gogol dhaaf haysato, taas oo hadda laba sano uu san xadgudub sammayn. Xadgudubkiisu wuxa uu ka bilaabmay markii ay xaskiisu rabtay inay iska furto isaga.
waxayna taasi ku qasabtay inuu xilli hore hawlgab ka noqdo shaqadiisa maamulnimada iskoolka.
Tom Waxa uu sheegaa in uu codsaday ama dalbaday kooxda, ka dib markii wax qatar ah ay ku dhacday gabartiisa, iyo sidoo kale hooyadiisna way jiran tahay.
Waxa uu u baahan yahay inuu fahmo dabeecadiisa. Wuxuu ka codsanayaa haddii ay habboon tahay in isaga iyo Iben ay isku koox noqdaan.
Daaweeyaha cilmi nafsiga ayaa ka codasaday Tom inuu isku dayo inuu naftiisa run u sheego.

*

Sii wadista qaybta (masraxa)-1aad

Iben wuxuu weli fadhiyaa makhaayadda, markii uu Tom ka tagay. Katja ayat u timid.
Waxayna Iben uga digtay Tom. Iben iyo daaweeyaha Steven ayaa is eegay. markii ay baxaysayna isagu wuu raacay.

*

Nasasho

Tom waxa uu haystaa xaanuun ah (inuu marwalba galmoodo) - sexmissbruk.

Wuxuu u sheegaayaa inuu doonayo inuu lahaado xiriir labo ama saddex markasta, isagoo xaaskiisa haysta. wax kasta waxuu u sameeynyaa inuu awoodlahaado oo u dareemo ammaan.
Iben wuxuu u arkaaa inay tahay inuu si xun u isticmaalayo jacaylka, iyadu marka ay noqoto nabadgelyo ma aaminsana. Ma u maleynayso iaydu inay u qalanto. Waxay had iyo jeer raadineysaa xiriir burbursan, halkaas oo ay doonayso inay u dadaasho jacaylkeeda.

Steven ayaa joojiyey Tom oo bilaabay inuu ka hadlo quraafaadka.
Sida qof aan markii hore ilmonimo soo arag wuxuu u baahanaan inu nolasha dame ku arko.
Iben ayaa yiri haddii uusan qofna u sheegin inuu mid jecel yahay. Tom wuxuu dhegta wax uga dhegayaa Iben.

*

Lennart iyo Lotti ayaa way isla kulmeen (shukaansi isku la kulmay), Lotti waxay jeclaan lahayd inay ku aragto, laakiin diyaar uma aha xiriiir. Waxay ugu jeclaan lahayd inay talo ka hesho saaxiibkeeda wanaagsan iyo leedare heedii hore, oo sidoo kale ahaa maamulahii hore Lennart.
Waxay u sheegeysaa Becki inay isku dayday inay disho, oo aay rabto in lagaa caawiyo sida ayu la dhaqmi lahayad fasalka iyo waalidiinta.

Waxay sidoo kale muujinaysaa caddayn taas oo ku taala dhamaadka buugga ee Lennart.
Lennart willka uu awoowga u yahay John waxaa lagu sheeagay halkaas.
Lennart ayaa ballanqaaday in uu la hadlo John, isaga oo buugga ka taxadaro.

*

Hanna iyo Kisser ayaa xallilayaa isku dhacadoo hore, Hanna waxay xafladii iska dhigatay inay saqraansantahay (cabtay khamro) sidii ay u wiilashu uga helaan, laakiin sidoo kale waxay khayaaneeysan oo dhaawacaday wiilka Kisser.
John iyo Hanna waxay leeyihiin xidhiidh marna ay kala tagaan marna is la socdaan, sidoo kale markii ay Hanna isku dayday inay ka maseyrsiiso John waxay shumisay oo taatabatay Miguel.
John wuu carooday, oo uga iyada u tagay Miguel. Taas oo si xun u dhawaacday Hanna.
Wadahadalka ayaa Hanna sidoo kale u sheegaysa kisser sawiradii uu Miguel tusay. Waa Becki.
Dhamaadka masraxa ayaa waxaa yimid Firus.
Gabdhaha ayaa waxay u malaynayaan insy kaftantahay, inuu waco Becki.
John wuu soo galay dabadeedna waana la aamusay. John wuxuu u sheegay Firus inuu san la sheekaysan karin gabdhaha.

*

John wuxuu fadhiyaa hoolka jaaliyada oo sugaya awoowe Lennart. Inakstoo uu sugayo hadana wuxuu mobilkiisa ka fiirsanaya porr (filmada galmada). Ronda ayaa u imaanaysaa oo waydiinaysaa waxa uu fiisranayo. Waxay waydiisanaysaa inay iyaduna fiirsato waxa uu fiirsanayo.
Waxay ka hadlaan porn (filim galmo), sido kale isku dhowaanshaha.
Filimka waxaa cod ahaan turjumaysa Katja.

*

Waalidiinta wareega habeenkii ayaa loogu wacay shir. Robban, Katja iyo Jaime ayaa horay u yimid. Robann wuxuu dareensan yahay in la eedeeyay oo la yaabay sababta ay u joogaan halkaas.
Waxba iyagu kuma lahayn iskudaygii idilidda Becki.
Waxay u maleynayaan in Daniella iyo Tom ay arki lahaayeen calaamado muujinaya in wax khalad ah hore u jiray.
Iben iyo Daniella way yimaadaan oo waxay ka hadlayaan isku dhowaanshaha iyo jacaylka caruurtooda iyo sida ay u arkaan jinsiga xiriirka iyo isdhexgalka. Robban ayaa sheegay in ay tahay mid isaga isugu haboon.
Waxaa jira laba waxyaabood oo kala duwan ayay tiri Daniella.
Waxaa had iyo goor lawaydiyaa su'aasha ah inay isku-dhowaanshuhu tahay wax wanaagsan oo leh aragti kala duwan.
Daniella iyo Katja waxay ka uga jeedaan inaanay gabi ahaanba ka hadlin wax ku saabsan xiriirka fal dambiyeedka dhibanaha, xiriirka burburka iwm.
Waxaa la weydiiya su'aasha ah sida ay ula hadlaan carruurtooda oo ku saabsan isku-dhawaanshaha iyadoo Iben sheegayo inay iyadu waxkasta u sheegto Kisser, inay iyadu ku baraarujiso oo ay u sheegatay inay iyada jecehsay.

Jaime wuxuu sheegaya in uu inta badan kala hadlo Miguel arimo ku saabsan bani aadmiga iyo muhiimada midba midka kale ku taageerayso.
Robban wuxuu John kala hadlayey cinjirrada kondoomka.

Katja ayaa sheegaysa in ay ku adkaatay inay la xiriirto ama wacdo Hannah dhamaan wadahadalada mobiilka ka dhexmaray.
Robban wuxuu yiri haddii aad ka dhexgashid John isagoo ciyaarayo ciyaar ama wax uu daawanayo waa uu carooda. Qof kasta wuu qoslaa.
Daniella waxay dhex gashashay ama joojisay hadalkii oo la yaabantahy haddii ay run ka tahay waxay u yimaadeen. Waxayna doonaysaa in ay ogaato waxay caddaynta buuggu ahayd.
Waalidiinta kale waxay ku jiraan difaac iyagoo ku eedeynaya Lotti masuuliyad xumaanta, iyo in aanay akhrin buugga oo aysan sheegi karin wax uu ku saabsan yahay, sidoo kale inaysan eedayn karin inuu uu iskuulku arrimahan wax ka qaban karo imo inkale.
Robban ayaa u sheagay inay waalid kasta masuuliyad ku tahay siduu u siiyo aamino iyo jacayl ubadkiisa.
Iben ayaa yiri waa waajib inaad lala hadlo carruurta si ay u bartaan inaysan xadkooda oo aysan noqonin sida Becki oo kale.
Daniella waxay bilowday inay oydo oo ay ka sheekayso sida ay u heshay Becki, iyo siday u bilaabeen daaweynta nafaha lagu badbaadiyo. Waxay kaloo u sheegaysaa in aysan Becki rabin inay sheegto sababta ay isugu dayay in ay isdisho. Waalidiinta kale ayaa taageeraya oo sasabaya waxayna u muuqdaan inay yihiin dad aad u wanaagsan. Marka ay nabadgelyeeyeen Daniella waxay aadeen kariyowki- karaoke (meel lagu heeso).

*

Miguel waxa uu u yimid Lotti markii ay fadhisay oo saxaysay imtixaanka. Wuxuu su'aaley xadka u dhaxeeya kufsi iyo ma'ahan kufsi.
Hadii aad eedaysantahay oo xitaa aadan ka jojin ama ka qaban wax uu qof kale sameeyay.
Wuxuu sidoo kale waydiiyay haddii uu kufsi yahay haddii aad iska dhigtid inaad qof kale tahay oo aadan taabanin.

*

Becki waxay internaytka ka la sheekaysanyaa qof qalaad. Hadda waxaan aragnaa inuu yahay Firus. Firus wuxa uu yiri in uu ka helo (jeycl ahaan) Becki, iyada aad ayay u faraxdaa. Waxa uu rabaa in ay sawir qaawanaan u dirto isaga.
Markii uu shaki galay iyada ayuu ku yiri waad ka maarmi kartaa, oo hadana waydiiyay in ay ku ciyaarayso iyo in kale. Waxay iyadu u sheegatay inaysan ku ciyareen oo u dirtay isaga sawir qaawan oo aysaan funaanad qabin.

*

Tom waxa uu hooyadii Marta u sheegayaa. Sida ay mararka qaarkood u maqnayd todobaadyo iyada oo isagu uusan ogayn meesha ay aaday. Mararka qaarkood aad uga ag dhowayd.

Mararka qaarna aad iyay aad uga fogayd, waxaana loo ogolaaday isaga inuu seexdo qolka kalluumeysiga. Marna ma uu ogayn meesha ay joogto. Iyadu weligeed uma sheegin dagaalka ama meesha ay ku sugnayd, laakiin waxay uga sheegatay sheeko ku saabsan adduunyada biyaha hoosteeda iyo dhowr diinyaal ah. Isagu weligiis ma rumaysnayn. Waxa uu codsaday "fadlan hooyo, Ma ii sheegi kartaa meesha aad ka joogtay.

*

Firus, Becki iyo Kisser waxay wada aqrisanayaan cilmi nafsi. Waxa uu ku saabsan yahay fikrado kala duwan ee Freud (fikradaha Frued) oo ay ka mid yihiin saadaalinta iyo eedaynytaa ama baabi'inta nafta.
Ugu danbeyntii , Firus wuxuu Becki waydiiyay sida ay dareemeyso, wuxuu si uusan rabin u muujiyay in uu yaqaano ayeeydeed aabbo.

*

Katja keligeed ayaa fadhida makhaayadda. Hannah ayaa soo wacday, Katja waxay ka codaneeysaa inay seexiso ina adeerkeed Simon, oo iyaga la nool.
Firus, Miguel iyo John ayaa yimid. Waxay ka caraysan yihiin sawirrada naxdinta leh ee Firus mobilkiisa ku jira, iyo iyadoo qofka sawirrada diray oo ku qoray "Ma rabtaa inaan i dilo?"
Katja waxay aaminsan tahay in sawirradu ay yihiin kuwa Hanna, waxayna u carootay si xoog ah. Waxay aad ugu qaylisaay oo u cananatay John oo u sheegtay inay Hanna ka daashay, oo ilaalinayso waxuu sameeyo. John intuu murugooday ayuu banaanka u cararay.

*

John wuxuu tusay Hanna buuggii galmada. wuxuu qiratay inuu sameeyay wax xun.
sidan halkaa ku qoran ama uu sheegayo.
Waxa uu dedejiyay Firus si uu u waydiisto sawirda qaawan ee Becki, kana hor imnaya rabitaanka Firus, ka dibna waxa uu la wareegay sheekada oo ku qasabay Becki inay usoo dirto waxyaala xun xun ama khatar ah. Wuxuu ku sheegay in awoowgii aabbe u sheegay inay Becki isku dayay inay isdisho.
Hanna waxay sheegaysaa in hooyadeed ay u sheegtay iyada oo ay ogayd inuu John waxaas oo dhan uu ka danbeeyay marwalba, sababtoo ah wuxuu ka codsaday iyadana in ay usameyso waxyaabo la mida oo xun xun. John wuxuu u sheegay inuu jecel yahay Hanna, laakiin uu ka shaki sanyahay inay ay maqashay.
Wuxuu ammaanayaa ciyaarteeda (qoob ka ciyaar, jaas) Waxay u sheegtay inay ogtahay inay ku fiicantahay.

*

Guriga ama hoolka dadweyna ka dhexeeya, ayaa dadkii wayeelka ahaa kaga hadlayaan waxyaalo

ku saabsan isku-dhawaanshaha iyo waqti wadaaga iyadoo ay farxad ka muuqato. Ronda iyo Eriksson waxay xusuus wada jir ah ka haystaan maadeeyihii caanka ah ee Charlie Rivel.
Firus ayaa soo galay. Waxa uuna raadinayaa Becki. Becki ayaa timid. Waxayna u sheegtay in ay heshay buuggii iyada oo uu John qiratay. Waxaad mooda inay iyaga sanduuq bir ah u kala dhexeeyso. Becki ayaa ku tiri waxaa laga yaabaa in buuggu uu iska yaalo halkaas in muddo ah. laakiin waliba waxay sii waydiisay Firus inuu xaasuusto xasuus uusan marnaba iloobi doonin, sidii ay ku samaysay oo kale qofkii ajnabiga ahaa ee internatyka.

*

Becki, Tom iyo Marta waxay aadeen xeebta. Becki waxay u sheegaysaa sheekadii ay Marta u sheegtay Tom iyo Tom oo u sheegay markaa ka dib iyada. Ka dibna waxay u sheegtay sida ay hadda kahor xeebtu cidla u ahayd oo ayan dabyal lahayn, in kastoo ay dabeeysha dhacaysay ay ilaalinayso ukunta diinka, iyo sidii ay u seexatay hurdo macaan badan halkaas, iyo siday u kacaday subax oo u daawatay markii ukunta diinka ay dilaacayso (ilmo noqonayso), iyo markii ay ilmaha diinka ay u sii guurguranyeen ama u dhex galayaan badda.